



## Kooxda kubbadda kolayga ayaa ku guuleystay horyaalka gobalka

Kooxda kubadda kolayga dugsigare ee gabdhaha Benson ayaa ku guuleysatay horyaalkii ugu horeeyay ee gobolka taariikhda barnaamijka, iyadoo sidaan ku guuleysatay guushii labaad ee difaacata horyaalka. Techsters waxay kaga adkaadeen Southridge 66-42 habeenkii sabtida ee ugu dambeeyay Jaamacadda Portland ee Chiles Center.

Guushaan waxay timid hal sano ka dib markii Benson imaatay finalka gobolka markii ugu horeysay, lakiin ku lumisay Southridge 46-27. Tababarihii Eric Knox, Techsters waxay xireen farqiga Skyhawks, kuwaas oo ay hogaaminayaan 6-foot-5 oo ah Cameron Brink oo dhan oo ka tirsan gobolka, oo ah mid aad u yar oo loo tixgeliyo mid ka mid ah ciyaartoyda ugu weyn ee taariikhda gobolka. Bishii Disembar, Benson iyo Southridge ayaa ku ciyaaray PIL Holiday Classic, halkaas oo Southridge ay ka adkaatay 55-50.

Waxay ahayd sheeko aad u kala duwan Sabtidii, markii Benson waxay ku bixi jirtay hogaanka horaantii oo aan marnaba lagu guuleysan. Ciera Ellington, oo ah xiddiga sannadka ee kooxda Portland FC, Led Benson wuxuu hogaaminayay ciyaar adag oo dhan, asagoo helay 20 dhibcood, sideed caawiye, lix difaac, seddex dhaliyayaal.

"Tani macnaheedu waa wax badan ma ahan Benson, kaliya ma ahan PIL, laakiin gabdhaha yaryar ee umuuqda sideenoo kale, gabdhaha madow iyo buniga ah ee Portland, tanina waa iyaga," ayuu yiri Ellington, oo loo doortay kooxdii ugu horreysay - xulashada dhammaan tartamada. "Haddii ay doonayaan inay wax ku guuleystaan, way sameyn karaan. Tani waa iyaga."

Tayle Lyler ayaa 15 dhibcood iyo 8 riige ah ku daray, iyo Aujae Yoakum oo leh 13 dhibcood iyo 8 riige; labadoodaba waxaa loo doortay kooxda labaad ee tartanka. Benson ayaa xilli ciyaareedkan ku dhameysatay iyadoo leh 26-4 riige, iyadoo guuldaradii kaliya ee ka soo gaartay kooxda gobolka ee bishii

December ciyaarti kala dhacday Southridge.

Horyaalka ayaa ahaa kooxdii gabdhaha ugu horeysay ee kubadda kolayga ee Benson, oo ah dugsi ku guuleystay shan horyaal oo kubadda kolayga ah. Waxay ahayd magaca lixaad ee gobolka PIL ee kubbadda kolayga, ciyaaraha isboortiga ee tan iyo 1976-kii, iyo markii ugu horeysay ee kooxda PIL tan iyo markii Jefferson uu ku guuleystay horyaalka heerka 5A ee 2010 intii lagu jiray tartanka PIL Qeybta hoose. Horyaalka PIL ee ugu dambeeyay ee ugu weynaa waxaa ka mid ahaa Marshall 1982.

[Eeg sawirrada ka soo baxa guusha ciyaaraha Benson](#)

**Wiilasha Kubadda Koleyga:** Sidoo kale Xarunta Chile Centre, Jefferson ayaa gaartay finalka wiilasha sanadka labaad ee isku xiga waxayna lumisay Jesuit 71-66 si ay ugu dhameysato tartanka. Democrats ayaa ku garaacday tartan rasmi ah oo ay ku tartamayaan Grant 87-68 Arbacada tartankooda furaha, isku hagaajin horyaalkii sanadkii lasoo dhaafay oo ay guushu ku raacday Grant.

Grant ayaa dib u soo laabtay si ay ugu guuleysto labadii kulan ee ugu dambaysay ee tartanka, waxaana uu ku guuleystay koobkii afaraad, iyadoo garacday Central Catholic 83-78 ciyaartii Sabtidii.

Jefferson senior Marcus Tsohonis iyo Sophomore Nate Rawlins-Kibonge ayaa loo doortay kooxda koowaad ee tartanka, Grant waxaa ku jiray Aaron Deloney iyo Ty Rankin oo loo doortay kooxda labaad.

[Fiiri sawirrada wiilasha finalka](#)

## Ardayda Laba Luqadood ee Soo kacaya oo iskugu yimid kulan

Boqolaal ka tirsan Ardayda dugsi sare ee Laba Luqadood ee Soo kacaya ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa dhawaan ka qayb galay Kulan Sanadeedkii 7-aad ee Hoggaanka Dhallinyarada ee Caalamiga oo ka dhacay Jaamacadda Gobolka Portland. Dhacdada maalinta oo dhan soconaysay waxaa loogu talagalay in ardaydeena muhaajirka iyo qoxootiga ah la kulmaan asxaabtooda ku baahsan degmada taasi oo loogu talagalay tababarka muhiimada la siinayo dhanka hoggaaminta, xiriirka iyo diyaarinta kulliyadda/xirfadda, iyo in loo dabaaldego faa'iidada dhanka luqadeed iyo dhaqan ee ay u keenaan bulshada dugsigeena.




[Daawo fiidiyaha](#)

## Marka ay timaaddo cimilada, PPS Shaqaalaha gaadiidka ayaa ku dhuftey waddada -- goor hore

Waxay ahayd aroor dhaw oo hore iyo ardayda Dugsiyadda Guud ee Portland waxay ahaayeen (kuwarajaynayo) qoto dheer habeenkii nasashada ee hurdada. Laakiin waxaa jiray nasasho yar oo loogu talagalay xubnaha gaarka ah ee PPS Shaqaalaha gaadiidka Iyadoo fursad loo helayo barafka iyo qaboojinta saa daalinta heer kulka, shaqaalaha ayaa ku dhuftey waddada qiyaastii 2:30 AM si ay u helaan macluumaad hore oo gacan ka geysanaya ka jawaabida su'aasha weyn. ardayda iyo qoysaskoodu waxay yeelan lahaayeen markii ay soo tooseen:

Miyaan dugsi gaadiidka aadaynaa maanta ?

Qalalaadka cimilada, nooca Portland wuxuu arkay sanadkan bartamihii illaa dabayaaqadii Febraayo iyo tan koowaad toddobaadkii Maarso, waxay kicin kartaa wadarta guud ee xiritaanka iskuulada, sida ku



dhacday PPS sannadkan Febraayo 5, marka barafka iyo qaboojinta heerkulku wuxuu keenay degmada oo dhan iskuulada iyo xafiisyada u dhow maalin. Ama waxay keeni kartaa dib u dhac furitaanka, sida dhacday Febraayo 25, markii dugsiyada la furay laba saacadood goor dambe.

Go'aanka ah in la xiro ama dib loo dhigo looma samayn si fudud PPS. Waxay ku lug leedahay shaqaale badan, iyo iyada waxay ka bilaabmaan jadwalka horaan ee hubinta wadada PPS Ardayga shaqaalaha wax qaada iyo Ardayga Koowaad, Adeegga baska ee heshiiska PPS. Sagaal xubnood ayaa ka kooban shan kooxood oo u soo baxa degmada gawaarida iyo wadista xaafadaha muhiimka ah ee ku hareereysan degmada, oo ka kooban 75 miles. Afar ka mid ah kooxo, hal xubnood oo ka mid ah darawallada, halka qoraalada kale ay u cusbooneysiyaan Teri Brady, Kaaliyaha Agaasimaha Gaadiidka.

Shaqaalaha Sandy van Baggen, Sheila Morris, Sharon Pierce, Sam Sonnichsen, Brandon Coonrod, Mary Richhart, John Kowitz, Mike Legette iyo Darleen Van Riper ayaa soo baxay 19-kii hore inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2018-19.

"Waxaan wadeynaa waddooyin badan oo degmada ka mid ah si aan u hubinno ammaanka carruurta," ayuu yiri Brady. "Aniga waxaan ku tiirsanahay kooxdayda. Waxay ii yihiin indhahayga iyo dhegahayga. "

Xubnaha shaqaalaha ee garoonka dhexdiisa, iyada oo la socota Brady, maamulaha hawlaha Keith Wright iyo maamulaha maareynta Rob McDougald, ayaa qiimeeya xaaladaha wadada si loo arko haddii ay ku badbaadi doonaan basaska iyo Qoysaska PPS si ay u kaxeeyaan. Brady waxay tiri iyadoo inta badan magaalada iyo wadanka barafka ay yihiin meelaha ugu muhiimsan, waddooyinka aan loola dhaqmin waa furaha, gaar ahaan kuwa ku quudiya dugsiyada.

Brady iyo afar maamulayaal kale oo ka socda Kooxaha Gaadiidka iyo Kaalmada waxay soo uruuriyaan warbixinno kus saabsan shaqada shaqaalaha oo wali la xiriiraan hay'adaha muhiimka ah, oo ay ku jiraan booliska, TriMet, magaalada, wadanka iyo degmooyinka kale ee Portland ee degaanka. Waxay sidoo kale si joogta ah ula xiriiraan farsamada cilmi-baarista ee degmada, Phil Volker, iyo sidoo kale kormeerka warbixinnada ka soo baxa khubarada kale, inta badan gaar ahaan Adeegga Cimilada Qaranka iyo Meel-hoosaadka ee cimilada.

Macluumaadka la soo ururiyay waxaa loo soo bandhigay koox lix xubnood oo ka kooban go'aan gaarista ugu dambeyn 5:00 am Go'aankani wuxuu noqon karaa dhowr siyaabood, oo ay ku jiraan furitaanka sida caadiga ah, dib u dhigidda degmada oo idil, furitaanka basaska ee waddooyinka barafka (ama degmada oo idil ama dooro dugsiyada), ama xirida gebi ahaanba maalinta. Kooxdu waxay soo jeedinaysaa talada Guud ee Gabi ahaanba Guerrero, oo go'aanka ugu dambeeya ka dhigaya 5:30 subaxnimo.

Laga soo bilaabo halkaas, go'aanka waxaa la siiyaa dhinacyo badan, oo ka bilaabmaya kooxda Isgaadhsiinta, kuwaas oo isticmaala barnaamijyo badan oo lagu wargaliyo qoysaska iyo warbaahinta. ([Akhri wax dheeraad ah oo ku saabsan sida macluumaadka sida loogu diray.](#)) Go'aanka ayaa sidoo kale loo gudbiyay xubnaha kooxda fulinta, oo ay ku jiraan maamulayaasha Adeegyada Nafaqada ee Nafaqada, Ciyaaraha, Khayraadka Shaqaalaha, Daryeelka Carruurta, Gaarka ah Waxbarashada, Maareynta Khatarta iyo dugsiyada kadib.

Guga hareeraha geeska iyo wakhtiga dayac-tirka wakhtiga kaydka ah ayaa shaqaynaya, waxay u muuqan kartaa soo kicidii hore ee gaadiidka ayaa ka soo wareegay shaqaalaha gaadiidka. Laakiin Brady, oo ka shaqeeyey PPS ilaa 12 sano, wuxuu leeyahay erey taxadar leh, isagoo leh:

"Waxaan lahayn xidhitaan Abriil."

## **Ardayda dugsiyada dhexe oo isku yimid si ay uga wadlaan dhanka isirka kaasi oo ahaa Kulankoodii 2-aad ee Codkaaga Ha La Maqlo**

Arday ka kala socotay dugsiyada dhexe ee PPS ayaa isku yimiday Kulliyada Bulshada ee Portland toddobaadkii la soo dhaafay kaasi oo loogu talagalay laba maalmood oo wada hadal furan la yeesho iyo iskaashiga hal abuurka ee Kulankoodii Labaad ee Codkaaga Ha La Maqlo 'Raise Your Voices Conference'.



Dhacdada labada maalmood socotay waxaa ku jiray ardayda dugsiyada dhexe oo ka kala socotay Beaumont, Beverley Cleary, da Vinci, Faubion, Harriet Tubman, Laurelhurst, Vernon iyo West Sylvan, oo ay weheliyaan farshaxaniistayaal, dad wax qora, mufakiriin iyo hoggaamiyayaal ka socday dugsiyada sare ee Grant iyo Jefferson. Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero ayaa sidoo kale ka qayb qaatay.

Ka qayb qaatayaashu waxay ka wada hadleen dhanka isirka, xuquuqda gaarka ah, aqoonsiga, sinnaanshaha iyo doorkooda ay ku leeyihiin abuurista dugsiyo iyo bulsho loogu talagalay mustaqbal kii hore ka duwan. Aqoon isweydaarsiyada waxaa gacanta ku hayay farshaxaniistaha/macallinka Bryan Lafaye, Naadiga Dhaqanka ee Dugsiyada Sare ee Jefferson, Youth Educating Police, iyo National Alliance for Filipino Concern.

"Kulankan loogu talagalay ardayda, waxaa soo abaabulay ardayda," ayay sheegtay Liz Kobs, oo ah la taliye ka ah Beverly Cleary oo gacan ka geysatay qabanqaabada dhacdada. "Waxay ardayda dhigaysaa bartamaha shaqada sinnaanshaheena dhanka isirka waxay awood u siinaysaa in ay qayb ka noqdaan isbeddelka."

Dugsiyada dhexe ee daneynaya ka qayb qaadadasha sanadkaa xiga, iyo ganacsiyada diyaarka u ah in ay ku deeqaan waxyaabo ama in ay noqdaan damaanad qaadayaal, waa in ay Kobs kala xiriiraan [lkobs@pps.net](mailto:lkobs@pps.net).

[Fiiri sawirro buuxa oo ka socda dhacdada](#)

## **Ardayda Rieke oo isku daray farshaxanka iyo taariikhda iyaga sameynaya kildhiyo 'teapots'**

Dusha sare, xafladda shaaha oo loogu talagalay ardayda fasallada shanaad waxaa laga yaabaa in ay muuqato mid aan meelna haysan. Balse marka ay noqoto ardayda Dugsiyada Hoose ee Rieke, xafladaha saddexda ee shaaha ee taxanaha ahaa waxay ahaayeen meesha u wanaagsanayd ee ugu heerka sareysay cutubka kaasi oo isku keenay farshaxanka iyo taariikhda Maraykanka.



Dhammaan 75 arday ee fasallada shanaad ee dhigta Rieke waxay sameeyeen mashruuc dhanka farshaxanka oo ay hagaysay macallimada dugsiyada ee Farshaxanka Ku takhasustay, Jill Mitchell. Mashruucani wuxuu ku lammaan yahay cutubka la baranayo ee ardayga ee ay ku jiraan barashada ku saabsan Xilliyadii Maraykanka La Gumaysanayay, oo ay ka mid yihiin Boston Tea Party, Kacaankii Maraykanka iyo Paul Revere. Fasalka waxaa ku jiray wada hadalo ku saabsan ganacsigii shaaha ee waagaasi, iyo sida is-addoonsigii qaybta uga ciyaaray.

Fasalka farshaxanka dhexdiisa, Mitchell waxay soo bandhigtay sawirka Revere (oo ahaa farsamo yaqaan macdan qalinka wax ka sameeya 'silversmith') oo kor u haya kildhi 'teapot', isaga oo uu weheliyo sawir



isagu leeyahay oo muujinaya kildhi 'teapot' uu sameeyay.

"Taasi waxay ahayd meeshii loo wada riyaaqay cutubka," ayay sheegtay Mitchell.

Mitchell waxay sidoo kale ardayda tustay tusaalooyinka farshaxanka casriga ah oo loogu talagalay dhiirigelin, ka dibna wuxuu ardayda faray in sameeyaan naqshado u gaar ah. Waxay isticmaaleen madooyin badan oo kale duwan, laga soo bilaabo bisada/mukulaasha Cheshire Cat ilaa laga gaarayo kooxda kubadda cagta ee Portland Thorns, laga soo bilaabo doolshaha koobka ku jira 'cupcake' ilaa laga gaarayo xayawaanka mala awaalka ah ee unicorn.

"Waxay dhammaan yihiin naqshado xiiso leh," ayay sheegtay Mitchell.

Shaqada lagu sameynayay kildhiyadu 'teapots' waxay qaadatay laba bilood waxaana ka qayb qaatay Mitchell oo iyada u qaaday Dugsiga Sare ee Wilson oo meesha u dhow, halkaasi oo macallinka farshaxanka muuqaalka ee Andrew Butterfield ay iyada u oggolaatay in ay isticmaasho foornada wax lagu qalijiyee ee dugsiga 'kiln' (Rieke malaha mid). Toddobaadkii la soo dhaafay Rieke waxay qoysaska ku martiqaaday in ay ka soo qayb galaan xafladda shaaha, oo mid kasta loogu talagalay mid ka mid ah saddexda fasal ee shanaad, iyadoo la bixinayay shaah iyo rooti gaaban (kildhiyada 'teapots' ardaydu sameeyeen looma isticmaali jirin in lagu bixiyo shaah, inkasta oo loo isticmaali kari lahaa).

Fasalka waxaa laga dhigay meel lagu soo bandhigo sawirka, oo leh kildhiyada 'teapots' la soo bandhigayo, iyada warqadaha wax lagu dhejiyo 'Post-it Notes' laga helayay meel kasta oo kildhi 'pot' yaalay si loogu ogolaado jawaab celinta laga helo ardayda iyo waalidiinta.

"Xafladda shaahu waxay ahayd meesha ugu heerka sareysay, ee dabaaldega cutubka la baranayay," ayay sheegtay Mitchell.

---

## **Benson oo qorsheeyay in uu barnaamijyadiisa badan ku soo bandhigo Bandhiga Farsamada ee sanadlaha ee 99<sup>aad</sup>**



Ma rabtaa in aad aragto robot-yada oo shaqeynaya? Ku ciyaar miisaska qulqulaya 'stream tables' isla markaana isku day tijaabooyinka kiimikada? Gado shaqooyinka ardayda farshaniistayaasha ah ee hibadda leh? Fiirso bandhiga mashaariicda guriga yar iyo tiknoolajiyada guryaha casriga ah? Fiiri warbaahinta suxufinimada ee tooska loo baahinayo? Arag bir la dhalaaliyay/dareere ah oo ah meel lagu shubayo?

Ma kuu haynaa dhacdo adiga laguugu talagalay. Bandhiga Farsamada ee Benson waxaa markii 99-naad la qaban doonaa Khamiista iyo Jimcaha, Maarso 14-15. Dhacdada lacag la'aanta ah waxay soconaysaa laga bilaabo 6 ilaa 9 habeenimo, labada habeenba.

Dhacdadu waa bandhig loogu talagalay barnaamijyo badan oo laga bixiyo Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson, oo sidoo kale loo yaqaano waxbarashada heerka sare ee afarta sano ah ee Oregon oo diiradda la saaro dugsiga sare. Benson "wuxuu bixiyaa tacliin adag iyo tababar dhab ah oo gacanta laga qabanayo oo ardayda u diyaarisa kulliyad iyo xirfad sare, shaqo qarniga 21-aad la socota oo lacag badan la qaadanayo."

Benson, oo ku taala [546 NE 12th Ave.](#), waxa albaabadeeda u furi doontaa dadweynaha, iyaga oo dadka soo booqdaa ay ku wareegi karaan hoolasha isla markaana qaadan karaan 32 bandhig oo ah fasallada

iyo qolal kale. Marka lagu daro bandhigyada kor ku qoran, waxaa sidoo kale jiri doona:

- Soo bandhigista naqshadaha la kala dooranayo oo loogu talagalay dhismaha Benson, oo la qorsheeyay in uu maro [olole qeyn oo dhanka casriyeynta ah](#) oo bilaabmaya sanada 2021. Qiyaasta nooca goobta jimicsiga oo faahfaahsan iyo dhismaha oo buuxa ayaa la soo bandhigi doonaa.
- Soo bandhigista dhisme ku qalabeysan mishiino, mishiino loogu talagalay isticmaalka shaqada alwaaxda/birta 'lathes', giriiga/jeega ku shaqeeya cadaadiska 'hydraulic jacks' iyo qalabka kale ee warshadaha.
- Istudiyoo sawir toos ah lagu qaadayo, halkaasi oo dadka soo booqdaa laga qaadi karo sawir.
- Saddex bandhig oo kala duwan oo dhanka caafimaadka ah, oo ay ku jiraan casharka CPR, baaritaanka sonkorowga, qalliinka fudud iyo soo bandhigista tolliinka 'suture, iyo is-tusida farsamooyinka saxda ah ee rumayashada/cadayashada iyo findhicilashada.
- Gadista buug-sanadeedyada dugsiga ee Benson ee sanadihii hore, oo ka socda 1970 ilaa 2012, oo intooda badan cusayb ku dhow yihiin.

Liiska buuxda ee bandhigyada, fiiri [website-ka dhacdada](#).

---